PINE REST Christian Mental Health Services

Siyaasadda U Qalmidda Kaalmo/Gargaar Maaliyadeed

Siyaasaddan waxay khuusaysaa dhammaan hawlgallada caafimaadka ee Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee Masiixiyiinta ee Pine Rest [Pine Rest Christian Mental Health Services] (Pine rest) iyo dhammaan bixiyeyaasha ay ka shaqeysiisay Pine Rest.

Taariikhda Dhaqangalinta: May 1, 2018

Ogeysiiska Takoorid-La'aanta: Pine Rest waxay u hoggaansan tahay/raaceysaa sharciyada xuquuqda madaniga ee federaalka ee lagu dhaqmo mana sameyso takoorid ku saleysan jinsi, midab, asal qaran, da'da, naafonimada, ama jinsiga. Pine Rest ma kala eexato dadka ama ulama dhaqanto si duwan sabab ah jinsi, midab, asal qaran, da'da, naafonimada, ama jinsiga. Eeg Lifaaqa A si aad u hesho ogeysiiska buuxa ee takoorid-la'aanta iyo sidoo kale helitaanka caawimaada luqadda.

I. Ujeeddada

Ujeeddada siyaasaddan waa in lagu muujiyo hannaanka loo sameeyo go'aan qaadasho macquul ah ee cidda u qalma in ay helaan kaalmada/gargaarka maaliyadeed ee Pine Rest; in loo sheego in la heli karo kaalmo/gargaar maaliyadeed bukaannada iyo dadweynaha; iyo in la hubiyo in tilmaamaha isbarbar dhiga lagu sameyn codsiyada kaalmada/gargaarka maaliyadeed, iyadoon loo eegin goobta Pine Rest ee meesha adeegga bukaanka lagu bixiyo.

II. Ma'suuliyadaha

Siyaasaddan U-Qalmida Kaalmada/Gargaarka Maaliyadeed ee Pine Rest waxaa maamuli doona shaqaale Pine Rest oo si haboon loogu magacaabey sida ku qeexan habraacyada taageeraya.

III. Falsafada

Falsafadda Pine Rest waa in ay bixiyaan adeegyo daryeel caafimaad hab-dhaqaneed oo tayo u leh dhammaan dadka noo yimaada oo raadinaya kaalmadeena/gargaarkeena. Baahida caafimaadeed waxaa go'aamin doona bixiyaha daryeelka ee daaweynta bixinaya. Go'aaminta kaalmada/gargaarka maaliyadeed waxaa lagu bixin doonaa iyadoo lagu saleynayo baahi maaliyadeed oo muuqata waxaana lagu bixin doonaa iyada oo lala kaashanayo bukaanka/kafaala ama damaanad qaadaha. Dhammaan bukaannada / kafaala ama damaanad qaadeyaasha codsanaya kaalmada/gargaarka maaliyadeed waxaa lagu qaadi doonaa isla habraaca kaalmada/gargaarka maaliyadeed iyada oo aan loo eegeyn bixiyaha assaasiga.

IV. Siyaasadda Daryeelka Caafimaadka ee Deg-deg ah

Pine Rest waxay bixin doontaa, iyada oo aan loo kala eexan, daryeelka xaaladaha caafimaad ee degdegga ah ee shakhsiyaadka iyada oo aan loo eegayn awoodooda bixinta kharashka ama u-qalmida kaalmada/gargaarka maaliyadeed. Pine Rest kuma lug yeelan doonto ficillada ka niyadjabinaya shakhsiyaadka inay raadsadaan daryeel caafimaad oo degdeg ah, iyo, sidaa darteed, daryeelka degdegga ah waxaa loo bixin doonaa iyada oo aysan faragelin ka iman aruurinta deynta ama codsasho ah horey u bixinta kharashka adeegyada inta kahor daaweynta.

V. Siyaasadda

A. Eegid Guud

1. Kahor inta aadan raadsan kaalmo/gargaar maaliyadeed, bukaanka/kafaale-qaadaha iyo Pine Rest waxay sii wadayaan dhammaan qaababka macquulka ah ee kharash bixinta dhinac saddexaad.

2. Waa siyaasadda Pine Rest in ay u baahato in si buuxda loogu bixiyo dhammaan adeegyada la qabtay.

3. Bukaanada/kafaale-qaadeyaasha ee cadeeya inay dhaqaale ahaan awood u lahayn, ama ay u aqoonsatay Pine Rest inay yihiin kuwo la filayo in aysan dhaqaale ahaan awood u lahayn, waxaa loo gudbin doonaa shaqaalaha habboon si ay u qiimeeyaan, hadba sida ay tahay. Shaqaalaha Pine Rest ayaa laga yaabaa markaa kadib inay u gudbaan habraaca codsiga kaalmada/gargaarka maaliyadeed si ay u go'aamiyaan haddii ay jirto awood dari in la bixiyo kharashka oo muujisan. Bukaanka/kafaale-qaadaha waxaa la weydiin karaa inuu buuxiyo codsi kaalmo/gargaar maaliyadeed. Warbixinta amaahda ayaa laga yaabaa in la helo si loo xaqiijiyo macluumaadka ku qoran codsiga, laakiin looma adeegsan doono in go'aan loogu gaaro u qalmida kaalmo/gargaar maaliyadeed. Qayb ka mid ah ama dhammaan habraaca codsiga maaliyadeed ayaa laga yaabaa in laga dhaafo bukaanada/kafaale-qaadayaasha sida caadiga ah u qalma kaalmada/gargaarka maaliyadeed oo kadibna la xaqiijiyey, inay la socoto siyaasaddaha iyo nidaamka Pine Rest. Tusaalooyin ahaan waxaa laga yaabaa inay ka mid yihiin shakhsiyaadka loo arko inay yihiin hoy/guri la'aan ama dhintey iyaga oo aan hanti laheyn.

4. Haddii, natiijo ka timid habraaca codsiga maaliyadeed, shuruudaha gargaarka aan la buuxin, bukaanka/kafaale-qaadaha waxaa lagula talinayaa in uu diyaariyo lacag bixinta sida ku xusan Siyaasadda Pine Rest ee Kharash-ku-dalicida Bukaanka iyo Lacag Uruurinta iyo habwaxqabadyada khusaysa, taas oo uu bukaanka/kafaale-qaadaha laga yaabo inay u qalmi karaan qiima dhimis iyo/ama ikhtiyaaro kale ee lacag bixin ah sida lacag dhimista ah lacag bixinta degdegga ah ama qorshooyin lacag bixin.

5. Haddii ay u muuqato in tilmaamaha dhibaato dhaqaale ee adag ay dhici karto, bukaanka/kafaale-qaadaha waxaa la weydiisan karaa inay keenaan dukumiinti taageeraya iyo waxaa codsiga loo wadi doonaa si saa ku habboon.

6. Koontada bukaanka waxaa lagu diiwaangelin doonaa natiijooyinka go'aaminta. Dadaalo macquul ah ayaa la sameyn doonaa si loogu wargaliyo bukaanka/kafaale-qaadaha si qoraal ahaan go'aanka la qaatay (oo ay ka mid tahay, haddii ay khuseyso, kaalmada shaqsiga uu u qalma) iyo aasaaska/sababta go'aanka.

7. Dukumiintiyada khuseeya iyo taageeraya codsiyada waxaa loo hayn doonaa iyadoo la raacayo siyaasadaha haynta dokumentiga.

B. <u>Ilaha Kharash-Bixinta Dhinac Seddexaad</u>

Kahor inta aadan raadsan kaalmo/gargaar maaliyadeed, bukaanka/kafaale-qaadaha iyo Pine Rest waxay sii wadayaan dhammaan qaababka macquulka ah ee kharash-bixinta dhinac saddexaad oo ay ka mid yihiin laakiinse aysan ku koobneen Medicaid iyo isqorista Isweydaarsiga Ceymiska Caafimaadka (Health Insurance Exchanges). Pine Rest waxay xaq u leedahay xaquuqda baaritaanka, hubinta, wareysiga iyo meelaynta codsiga ee:

1. Dhamaan gargaarada/faa'iidada laga helo wixii ilo caymis oo dhinac saddexaad ah;

2. Dhammaan gargaarada/faa'iidada laga helo barnaamijyada kaalmada/gargaarka gobolka ama federaalka ee uu bukaanka/kafaale-qaadaha uu u qalmi karo;

3. Dhammaan gargaarada/faa'iidada laga helo wixii hay'ad samafal ah; iyo/ama

4. Dacwadaha-maxkameed ee la sugayo.

Kaalmada/gargaarka maaliyadeed waa habraaca xalinta xisaabta/koontada ee ugu dambeeya. Sidaas darteed, bukaan/kafaale-qaade waa inuu guto waajibaadka saaran ee hoos yimaada mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada kor ku xusan ee khuseeya ama isticmaalo ilaha shaqsiyeed ee uu heli karo ka hor inta u qalmida kaalmo/gargaar maaliyadeed. Bukaank/kafaale-qaade markuu ku guuldareysto inuu soo saaro macluumaadka la codsaday ama uu ka qeybqaato mid ka mid ah barnaamijyada kor ku xusan waxay sababi kartaa in loo diido kaalmada/gargaarka maaliyadeed.

C. <u>Helida Kaalmada/Gargaarka Maaliyadeed</u>

Pine Rest waxay hirgalisay tillaabooyin loogu wargelinayo bukaanada iyo dadweynaha ee ku saabsan helida kaalmada/gargaarka maaliyadeed. Hababka wargelinta waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn macluumaad lagu bixin xafiisyada aqbalaadda, qolalka sugitaanka iyo goobaha kale ee dadweynaha, iyo sidoo kale macluumaadka laga heli karo website-ka Pine Rest. Intaas waxaa sii dheer, Pine Rest waxay bixin doontaa qoraal luqad sahlan ah oo kooban ee ah Siyaasaddeeda U-qalmida Kaalmo/Gargaar Maaliyadeed iyada oo qayb ka ah qaadashada bukaanka iyo/ama habraaca siidaynta, iyo sidoo kale in ay siiso shakhsiyaadka caawimaad ah dhammaystirka habraaca codsiga.

Bukaanada waxaa lagula socodsiin doonaa Siyaasadda U-Qalmida Kaalmada/Gargaarka Maaliyadeed qoraalada kharash-bixinta ugu yaraan muddo ah 120 maalmood laga soo billaabo taariikhda qoraalka biilka/kharash-bixinta ugu horeeyey ee siidaynta kadib. Isku dheellitirka bukaanka wuxuu u qalmi doonaa qiimeynta kaalmo/gargaar maaliyadeed ugu yaraan 240 maalmood laga soo billaabo taariikhda qoraalka biilka/kharash-bixinta ugu horeeyay ee siidaynta kadib (“Muddada Codsiga”). Haddii Pine Rest ay hesho codsi kaalmo/gargaar maaliyadeed inta lagu juro Muddada Codsiga, xataa haddii codsigu yahay mid dhammaystiran ama aan dhammaystirnayn, waxay joojin doontaa dadaal kasta oo lacag aruurinta ah illaa go'aan laga gaaro kaalmada/gargaarka maaliyadeed.

D. <u>Aqoonsiga Kaalmada/Gargaarka Maaliyadeed iyo Habraaca Codsiga</u>

Himilada/Ujeedada habraaca u qalmida kaalmada/gargaarka maaliyadeed waa in la go'aamiyo awooda bukaanka/kafaale-qaadaha in uu bixin karo kharashka. Nuqul lag la’aan ah ee Siyaasadda U-Qalmida Kaalmada/Gargaarka Maaliyadeed, iyo sidoo kale codsiga kaalmada/gargaarka maaliyadeed iyo soo koobitaan luqadda sahlan ah ee siyaasada, ayaa laga heli karaa goobaha rugaha caafimaadka ee Pine Rest, ee https://pinerest.org/about-us/financial-assistance, adiga oo wacaya (616) 455-5019 ama iimayl ugu diraya la-taliye ilaha maaliyadeed patientnaccounts@pinerest.org. Shaqsi kasta waxaa laga yaabaa in looga baahdo inuu buuxiyo codsiga kaalmo/gargaar maaliyadeed iyo uu bixiyo macluumaadka Pine Rest ay u codsatay ka qeyb ahaanta codsiga. Pine Rest waxay u go'aaminaysaa kaalmada/gargaarka maaliyadeed si ku saleysan tilmaamaha dhibaatada adag ee dhaqaale ee lagu dejiyey siyaasadda.

E. <u>Dukumiintiyada Maaliyadeed ee Taageeraya</u>

Pine Rest waxaa laga yaabaa inay u baahato nuqullo ah jeegagga mushaharka, canshuur celinta dakhliga federaalka iyo wixii dakhliyo kale ah iyo ilaha xaqiijinta hantida. Teknolojiyadda ayaa laga yaabaa in loo isticmaalo inay u caawiyaan si firfircoon oo wax ku ool leh si loogu aqoonsado bukaannada u qalma kaalmada/gargaarka ama si looga dhigo otomaatig habraaca loo helo xogta lagama maarmaanka ah iyo falanqaynta awoodda lacag bixinta. Codsadayaasha waxaa laga yaabaa in laga codsado inay caawiyaan oo ay la shaqeeyaan sidii looga codsan lahaa kaalmooyin/faa’iidooyin ceymis dhinac saddexaad, gobolka, federaalka ama barnaamijyada samafalka ee kale ee horay loo soo sheegay.

PINE REST Christian Mental Health Services

F. U Qalmitaanka Tilmaamaha Dhibaatada adag ee Maaliyadeed

Marka la go'aaminayo u-qalmida kaalmo/gargaar maaliyadeed, Pine Rest waxay qiimeyn doontaa awoodda bukaanka/kafaale-qaadaha uu u leeyahay inuu dib-ugu-magdhawo Pine Rest adeegyada la codsaday ama horay loo helay.
Pine Rest waxay qiimeyn doontaa macluumaadyada sida soosocda:

1. Heerarka dakhliga
2. Qiimaha saafiga ah
3. Xaaladda shaqo
4. Waajibaadka kale ee dhaqaale/maaliyadeed
5. Qiimaha iyo inta jeer ee biilasha/kharash-bixinyada daryeelka caafimaadeed

Warbixinta amaahda/daynta ayaa laga yaabaa in la helo si loo xaqiijiyo macluumaadka. Pine Rest waxay adeegsan doontaa Tilmaamaha Saboolnimada ee Federaalka Mareykanka ee hadda jira iyada oo saldhig u ah u qalmitaanada u qalmida dakhliga. Qiimo-dhimis ilaa iyo 100% ah ayaa la bixin doonaa iyada oo ku xiran dakhliga qoyska ee dadka dakhligoodu yahay ama ka hooseeya 250% ee Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ee sanadka hadda ah. Diiwaannada maaliyadeed ee la xiriira dakhliga qoyska bukaanka/kafaale-qaadaha ayaa sidoo kale la codsan karaa, ma aha in lagu meeleeyo mas'uuliyadda dhinac saddexaad, laakiinse in loo go'aamiyo sida ay si toos ah ugu saameynayaan xaaladda maaliyadeed ee codsadaha. Qoyska, sida lagu qeexay Xafiiska Tirakoobka Mareykanka, waa koox ah labo xubnood ama in ka badan oo qaraabo ah, ama dhalasho ahaan ha ahaato, guur, korsasho, ama haddii kale ba, oo isla nool (dadka aan qaraabo ahayn, sida dadka guriga wada deggan, lama tirinayo); Dhamaan dadka qaraabada ah ee kuwada nool hal guri waxaa loo tixgaliyaa inay yihiin hal qoys. Pine Rest u ma tixgelinayso shakhsiyaadka ku nool hal guri laakiinse si gooni ah qof walba isu taageeraya si ah qoyska oo dhan. Xaaladda nololeed ee ku meelgaarka ah oo ay sabab u tahay xaalad caafimaad sidoo kale ma khusayn doonto. Taariikhda caafimaadka, dabeecada iyo/ama bulshada ee bukaanka lama tixgelin doono marka qiimaynta awooda lacag-bixinta.

G. Isku-mid-ahaanta

Si loo hubiyo isku-mid-ahaanta ku dhaqanka siyaasaddan gudaha Pine Rest, waxyaabaha soo socdaa ayaa lagu dhaqmayaa dhammaan xarumaha Pine Rest ee khuseeya:

1. Dhammaan kharashyada waxaa lagu diwaangelin doonaa koontada/xisaabta bukaanka iyadoo la raacayo habwaxqabadyada kharash ku dalacida caadiga ah. In kasta oo kharashyada ay yihiin aasaaska ujeeddooyinka biilida/kharash ku dalacida iyo keydinta diiwaanada lacag uruurinta, kharash-baxyada (ma ahan kharash ku dalacida) sidoo kale jadwalka kharashka Medicare haddii la heli karo, waxay noqon doonaan qaybta wargelinta assaasiga ah ee qiimeynta kaalmada/gargaarka maaliyadeed.
2. Adeegyada looguma “hoos dhigi (down coded)” doono lacag bixin yar.
3. “Naxariis xirfad leh” lama adeegsan doono.
4. Pine Rest ma sameyn doonto takoorid ku saleysan jinsi, midab, asal qaran, dhalasho, jinsiga, diin, da’da, naafonimada, ra’yi siyaasadeed, hanuunka galmada, iyo xaaladda

guurka ama qoyska.

5. Bukaannada buuxiya shuruudaha siyaasaddan oona loo oggolaaday kaalmada/gargaarka maaliyadeed waxay u qalmi doonaan daryeel degdeg ah oo bilaash ah ama caafimaad ahaan lagama maarmaan ah inta lagu jiro muddada oggolaanshaha ee lagu qeexay Qeybta 6.9. Sababtoo ah Pine Rest wax lacag ah kama qaaddo bukaannada u-qalma kaalmada/gargaarka maaliyadeed ee hoos yimaada siyaasaddan, Pine Rest waxay si buuxda u raacaysaa “qiimaha guud ahaan la dallaco” iyo xaddigayada ka yar kharash dalacida guud ee khuseeya isbitaalada samafalka bixiya.

H. Habraaca Oggolaanshaha Codsiga

1. Dhamaan go'aaminta kaalmada/gargaarka maaliyadeed waa inay ansixiyaan shaqaalaha habboon sida lagu qeexay Habwaxqabadyada U Qalmida Kaalmo/Gargaar Maaliyadeed.

2. Dukumiintiyada taageeraya waa inay la socdaan dhammaan dib-u-habaynta kaalmada maaliyadeed.

I. Muddada Oggolanshaha

Dhammaan oggolaanshaha codsiyada kaalmo/gargaar maaliyadeed ee lagu sameeyeye Siyaasadda U Qalmida Kaalmo/Gargaar Maaliyadeed waxaa laga yaabaa in la dhaqangaliyo ugu yaraan muddo 90 maalmood ah waxaana ka jira xaalad xigta ee imaata ama daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah. Isbeddelka xaaladda maaliyadeed ama ku darista bixiye saddexaad oo qalma ayaa laga yaabaa inuu beddelo muddada oggolaanshaha una baahan doona dib u eegis dheeraad ah.

J. Habraaca Rafcaanka

Shakhsiyaadka loo diido kaalmada/gargaarka maaliyadeed ee hoos imaanaya sharciyada siyaasadda waxay codsan karaan dib u eegista go'aanka. Dib u eegista waxaa lagu sameyn doonaa heerka xiga ee awooda ansixinta. Rafcaannada gaara heerka ka sarreeya maaraynta Xisaabaha Bukaanka waxaa loo qaadayaa gole hoggaanka sare ee Pine Rest ee uu soo xushay Maamulaha Sare ee Maaliyadda ee Shirkadda Pine rest ama wakiilkiisa/wakiilkeeda.

K. Dadaallada Lacag-Uruurinta marka ay Dhacdo lacag-bixin la'aan

Haddii ay dhacdo in bukaanka/kafaale-qaadaha uusan codsan ama uusan u qalmin kaalmo/gargaar maaliyadeed ee hoos imaanaya siyaasaddan, tillaabooyinka lacag-aruurinta ee laga yaabo inay Pine Rest qaadato haddii ay dhacdo lacag bixin la’aan ayaa si buuxda loogu sharaxay Siyaasaddeeda ee Biilinta/Kharash-ku-dalacida Bukaanka iyo Lacag Ururinta. Nuqul lacag la’aan ah ee siyaasaddan ayaa laga heli karaa dhammaan goobaha Pine Rest, ee https://pinerest.org/about-us/financial-assistance adigoo wacaya (616) 455.5019 ama iimayl u diraya patientaccounts@pinerest.org. Ogaysiis qoraal oo gaar ah ayaa la siin doonaa shaqsi walba ugu yaraan 30 maalmood kahor inta qaadashada talaabooyinka lacag-aruurinta la bilaabayo.

L. Aasaaska Xisaabinta Qiimaha Guud Ahaan La Soo Dalaco

Pine Rest waxay isticmaashaa habka gadaal u eegida iyadoo lagu saleynayo sheegashooyinka ay oggol yihiin adeegga-kharashka-ah ee Medicare inta lagu jiro laba iyo toban bilood ka hor si loo go'aamiyo Qiimaha Guud Ahaan La Soo Dalaco (Amount Generally Billed - AGB).

Pine Rest kuma soo dalacdo ama kama fileyso bixinta kharashka guud/wadarta kharashka

shakhsiyaadka u qalma kaalmada/gargaarka maaliyadeed sida hoos timaada Siyaasaddan U-Qalmida Kaalmo/Gargaar Maaliyadeed.

VI. Dib u eegisyada/Wax-ka-Beddelida

Pine Rest waxay xaq u leedahay inay wax ka beddesho, wax ku darto, wax si uga beddesho ama ka tirtirto Siyaasaddan wakhti kasta iyada oo aan bixin wax ogeysiis hore oo qoraal ah. Dhammaan dib-u-eegida/Wax-ka-beddelida wixii ku lifaaqan siyaasaddan waxaa loo wakiishay Agaasimaha Xisaabada/Koontada Bukaanka.

VII. Sameynta Siyaasadda iyo Ansixinta/Oggolaanshaha:

Mulkiilaha Dukumiintiga:
Paul H. Karsten, Maamulaha Sare ee Maaliyadda

Maamulaha Dukumiintiga:
Andrea Schachow, Agaasimaha Xisaabada Bukaanka

Ansixinta:
Mark Eastburg, Maamulaha Sare ee Fulinta

PINE REST Christian Mental Health Services

Lifaaqa A

Ogeysiiska Takoorid-La'aanta:

Pine Rest waxay u hoggaansan tahay/raaceysaa sharciyada xuquuqda madaniga ee federaalka ee lagu dhaqmo mana sameyso takoorid ku saleysan jinsi, midab, asal qaran, da'da, naafonimada, ama jinsiga. Pine Rest ma kala eexato dadka ama ulama dhaqanto si duwan sabab ah jinsi, midab, asal qaran, da'da, naafonimada, ama jinsiga.

Pine Rest:

- Waxay siisaa caawimaad iyo adeegyo lacag la'aan ah dadka naafada ah si ay si tayo leh noogula soo xiriiraan, sida:
  - Turjubaanno aqoon u leh luqadda dhegoolaha/faraha
  - Macluumaad ku qoran qaabab kale (far waaweyn, maqal, qaabab elektiroonig ah oo la heli karo, qaabab kale)
- Waxay siisaa adeegyo luqadeed oo lacag la'aan ah dadka afkooda koowaad uusan aheyn Af Ingiriisi, sida:
  - Turjubaanno aqoon leh
  - Macluumaadka ku qoran luqado kale

Haddii aad aamminsan tahay in Pine Rest ay ku guuldareysatay bixinta adeegyadan ama in qaab kale laguu takooray iyada oo ku saleysan jinsi, midabka, asal qaran, da'da, naafonimo, ama jinsiga, waxaad u fayl-gareen/xereyn kartaa cabasho:

Director, Patient Accounts
517 36th Street
Grand Rapids, MI 49503
616-455-5019; lacag la'aan: 1-800-422-4215
patientaccounts@pinerest.org

Waxaad ku fayl gareen/xereyn kartaa cabasho shaqsi ahaan ama boosto ahaan, fakis ahaan, ama iimayl ahaan. Hadaad u baahan tahay caawimaad xagga fayl-gareenta/xaraynta cabashada, Agaasimaha Xisaabada Bukaanka ayaad heli kartaa inuu kaa caawiyo.

Waxaad sidoo kale aad u fayl garayn/xareyn kartaa cabashada xuquuqaha madaniga Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka, Xafiiska Xuquuqda Madaniga elektaronig ahaan adoo u maraya Portal-ka Xafiiska Cabashada Xuquuqaha Madaniga, oo laga heli karo https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf, ama ugu soo dir boostada ama taleefanka:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue SW, Room 509F, HHH Building
Washington, DC 20201
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.